



Halkan waxaa ku qoran dhowr wargalin oo muhiim ah oo hormarinaysa habqabka iyo ku haboonaanta raacitaanka gaariga Access.

Hormarinnada lagu sameeyay Barnaamijka Rider's Choice (Dookha Rakaabka)

Metro Degmada King iyo MV Transportation waxay fahmayaan baahida loo qabo inaad wakhtiga saxda ah u imaato safaradaada Adeegga Access Paratransit. Haddii safarku quseeyo balan caafimaad ama banaan bax bulsho, waxaan kuu nahay diyaar.



Sabab la xiriirta in Access uu yahay nidaam wadaag ah—oo ay dad kale oo rakaab ah kula raacayaan—waxaan aqoonsan nahay muhiimada ay leedahay inaan ku gayno meesha aad u socoto wakhtiga loogu talo galay. Kadib markii si taxadar leh dib u eegis loogu sameeyay xeerarka iyo habraacyada iskaashina aan la samaynay Guddiga La-talinta Gaadiidka Dadweynaha ee Dadka Naafada ah ee Access (Access Paratransit Advisory Committee, APAC), Access waxay ka dhigaysaa barnaamijka Rider's Choice mid fursado badan oo ay si fudud u isticmaali karaan dadka rakaabka ah.

Laga soo bilaabo Diseembartii hore, Rider's Choice ayaa siiyay dadka rakaabka ah dookh lagu dejin karo meesha ay u socdaan kahor inta aysan bilaaban mudadooda 30ka daqiiqo ah ee dejinta.

Laga bilaabo bishaan Janaayo 2024, waxaan hormar ku samayn doonaa barnaamijka Rider's Choice si aan ugu sii fududeyno aana u siino macaamiisheena maamulka safarkooda:

- Haddii aan qiyaasno in safarkaagu imaanaayo balanta xili ka horeeya wakhtigii la filaayay aadna saaran tahay hoomeeyda Access, waxaad heli kartaa wicitaanka taleefanka (fariin qoraallada ayaa dhawaan la hirgelin doonaa!).
- Wicitaankaas, waxaa lagu siin doonaa dookha sii wadashada mudadaadii hore ee dejinta ama inaad ku badelato dookha dejinta xili hore. Waxaa sidoo kale toos laguugu xiriiri karaan isu-dubbaridaha si aad u waydiiso wixii su'aalo ah. Haddii aadan helin wicitaan ama aad doorato mudadaadii hore ee dejinta, wali waxaad haysataa dookha sugitaanka ama ka bixida gaariga xili hore—arintaan kala hadal darawalkaaga inta lagu jiro dejinta rakaabka.

Hormarinadaan kadib, waxaad heli doontaa afar qaab oo kaladuwan oo aad dookhaaga ku gudbiso:

- Rukunkaaga ama boos cesashada safarkaaga gaarka ah, u sheeg kooxdaada boos qabashada.
- Wakhti kasta kahor inta aan safarkaagu bilaaban, codso inaad la hadasho isu-dubbaridaha.
- Inta lagu jiro safarkaaga, ka jawaab wicitaanka ama qoraalka otomaatiga ah.
- Marka lagu dejinaayo, u sheeg darawalkaaga.

Fadlan xaqiiji inaad khibrada aad kala kulantay Rider's Choice la wadaagto kooxdeena adeegga macaamiisha oo aad ka wacayso 206-553-3000!

Xaalada adeegga Access xili aan galayno 2024 Gwen Clemens, Agaasimaha Maamulka Adeegyada Qandaraaska

Xili aan sii galeyno 2024, waxaan diyaar u nahay isbadello; isbadellada maalmaha iyo heerkulka xili aan sugayno inaan biloowno sanad cusub aana wakhti la qaadanayno qoyskeena iyo saaxiibadeena—keliya qaar kamid ah waxyaabaha isku kaana haya naguna dhiiri geliya inaan hormar gaarno.

Waxaan doonayaa inaan cadeeyo abaalka aan idiin kaga hayno dulqaadkiina xili aan ka shaqeynayno hormarinta isku halaynta Access iyo khibradaada ka rakaab ahaan. Waxaan dooneynaa inaan kula wadaagno qaar kamid ah yoolalka muhiimka ah ee aan gaarnay sanadkaan aana si kooban wax uga taabano waxyaabaha aan dhammaanteen higsanayno sanadka 2024!

Guulaha ugu waawayn sanadka 2023 waxaa kamid ah:

- Wada hadalka ku aadan kordhinta muddo 2 sano ah heshiiska hadda ee Access. Kordhintaan ayaa muhiim u ahayn soo celinta abaal marinnada iyo ganaaxyada Cabirka Dedaalka ee Muhiimka ah (Key Performance Indicator, KPI). Abaal marinnada KPI iyo ganaaxyada ayaa ah qaabka guud ee Metro ku hirgeliso heerarka shaqada iyo dhiiri geinta qandaraaslaheena, MV Transportation, inay shaqada gaarsiiyaan heer ka sareeya oo ka balaaran heerarka ugu hooseeya ee heshiiska iyo adeegga macaamiisha.



Gwen Clemens

- Ka jawaabida qiimeyaasha sii kordhaaya ee mushaaraadka, gunnooyinka, shidaalka, iyo qaybaha gaariga ee soo waajahay MV Transportation iyo iskaasharadooda, sida Solid Ground.
- Wax ka badelka qaab dhismeedka qiimaheena si aan u waafajino isbadellada ku dhacaaya dalabaadka rakaabka. Heshiiska ayaa intiisa badan ku saleysan saacadaha dakhliga kuwaasoo ay hagaan dalabaadka rakaabku. Heerarkeena rakaabka ayaa hadda ah 69% heerarka rakaabka ee sanadkii 2019.
- Shaqo bilaabida mashruuca tignooloojiyada cusub ee Access ee U qalmida Macaamiisha (Access Customer Eligibility, ACE). Mashruucaan ayaa casriyaynaaya hanaanka codsiga ee adeegyada Gaadiidka ee Access.
- Qorsheynta Tijaabada Adeegga Isla Maalinka. Mashruucaan wuxuu u sahlayaa Rakaabka Access inay helaan adeegyada isla-maalinta ee safarada. Qandaraasle, VIA, ayaa masuul ka noqon doona mashruucaan tijaabada ah. Waxaad filan kartaa inaad aragto xog dheeri ah rubuca koobaad ee 2024.
- Sharciga Ameerikaanka Naafad aah (Americans with Disabilities Act, ADA) Maamulka Federaalka ee Isku Socodka (FTA) iyo Dib U eegista iyo Isla Xisaabtanka Sadexdii sanaba mar oo iskaashi la samaynaaya Sound Transit. Ma jiraan natiijooyin sheegaaya cilado dhanka ADA oo ay ku kacday Gaadiidka Access.
- Wax ka badelka qaar kamid ah isbadellada la dejiyay intii lagu jiray aafada cudurka ee COVID.

Mashaariicda waa wayn ee ay tahay inaad filato 2024

- Dhaqan gelinta Buuxda ee Tijaabada Adeegga Isla Maalinka.
- Qaybinta Xog Uruurinta Rakaabka ee Access. Xog uruurintaan waxay na siinaysaa fikirka muhiimka ee ku aadan sida adeegga loo bixiyo.
- Hawl gelinta gaadiidkii ugu horeeyay ee Access oo 100% koronto ku shaqeynaaya. Mashruucaan tijaabada ah ayaa hawl gelinaaya gaariyaasha gebi ahaanba korontada ku shaqeeya si looga caawiyo Metro inay si fiican u fahanto saamaynada shaqada iyo macaamiisha.
- Qaabab cusub oo macaamiishu ku dooran karaa Rider's Choice (eeg: *Hormarinnada lagu sameeyay barnaamijka Rider's Choice* ayaa ku qoran bogga koobaad).
- Dhaqan gelinta qorsheyaasha heer gobal ee safarka ee cusub ee **FindARide.org** oo loogu talo galay shaqsiyaadka qaba baahiyaha gaarka ah ee gaadiidka—shaqadaan waxaa hagaysa Hopelink oo iskaashi la samaynaysa Metro Degmada King.

Mustaqbalka u hag Access adigoo ku biiraya APAC!

Guddiga La-talinta Gaadiidka Dadweynaha ee Access ee Dadka Naafada ah (Access Paratransit Advisory Committee, APAC) ee Metro Degmada King ayaa kala taliya Metro, Maamulka Degmada King iyo Baarlamaanka Degmada King arimaha safarka iyo xerka ee la xiriira bixinta gaadiidka dadwaynaha oo ay u siman yihiin shaqsiyaadka naafada ah. APAC ayaa ka kooban xubnaha dhammaan degmada kuwaasoo ah rakaabka Access, xubnaha qoyska ee rakaabka Access, wakiillada ururada bixiya adeegyada la siiyo rakaabka Access iyo wakiillada iyo ururada taageera rakaabka Access ee ugu hadla Ingiriisiga luuqadooda labaad ahaan.

Sanadkii 2023, APAC ayaa tilmaan siisay Metro taasoo gacan ka gaysatay kor u qaadista dedaalka gaadiidka Access gacanna ka gaysatay balaarinta isku xirka iyo uruurinta fikradaha bulshadeenu ka qabaan Qorshaha Kalaguurka ee Metro's ADA. APAC ayaa sidoo kale talo ka bixisay adeegga hal abuurka leh ee isla maalinta la bixinaayo ee cusub waxayna fikir joogto ah oo guud ka siisaa shaqaalaha Metro sida kor loogu qaado Gaadiidka Access ee dhammaan Rakaabka.

APAC waxay si rasmi ah u qoranaysaa xubno cusub. Haddii aad ku nooshahay Degmooyinka Soo socda ee Degmada King, aad tahay rakaabka Access ama aad buuxiso midkood shuruudaha liiska ku qoran ee kore aadna doonayso inaad nala wadaagto khibradaada, xiriirada bulshada, aasaaska iyo khibrada, fadlan codsi gudbi. Diiwaan gelinta furan ayaa hadda ka socota xaafadahaan degmada:

- Golaha Deegaanka King Degmada 2
 - Waxaa ku jira Renton, Tukwila, qaybo kamid ah Miyiga Degmada King iyo bartamaha/Koonfurta Seattle.
- Golaha Deegaanka King Degmada 3
 - Waxaa kamid ah Bothell, Carnation, Duvall, Issaquah, North Bend, Redmond, Sammamish, Skykomish, Snoqualmie, Woodinville iyo Miyiga Waqooyi-Galbeed Degmada King.
- Golaha Deegaanka King Degmada 6
 - Waxaa kamid ah Beau Art Village, Bellevue, Clyde Hill, Hunts Point, Kirkland, Medina, Mercer Island, Redmond, Yarrow Point iyo qaybo kamid ah Miyiga Degmada King.

Codsiyada ayaa furnaan doona ilaa 11ka Febraayo, 2024. Booqo kingcounty.gov/metro/APAC si aad xog badan uga ogaato sida loo codsado.